

PUNTLAND REEFIS BAA GALAY!!!!!!!!!!!!!!

Tixdan hoose sida laga dheehan karo Puntland iyadoo ku socoto sugunto ama marshada labaad sheellarahana loo cusleeyey ayaa waxa la yiri war marshadan gaariga waa ku raagtaye marshada afraad hallageliyo si uu u dheereeyo, ra'yigaas waa loguuxay badiba dadkii, waxaana la iska dhex- doonay shufeer waxayna soo heleen hal odayoo ruug caddaa hore ah waxa lagu yiri ku dangiigso oo na kaxee isagiina waa aqbalay.

Rakaabkiina waxaa la yiri awal baad hurdaysnaydeene teendhadaas huwada oo dhab u seexda, Si aan dabayshu dhib idiinku geysan, maaddaama gaarigu xawaare dheereeya inuu ku socdo bilaabay si aan dabaysho idiin dhibaataayn. Wadihii Markii uu damcay inuu geyr beddelo waxaa kaga dhacday marshada dib u kaxaynta inta uu la dhaafay godkii afarta, tiyoo raggii darawalka la fadihiyey oo socodkaas jeclaysteyay yiraahdeen waa socod aad u raaxo badane halkaas noogu daa illaa dadkii oogada saarnaa teendhaa u xiran oo waa hurdaane.

Waxaa xusid mudan Gaarigu gadaal buu u socdaa, Muraayad-haadkii dhinaca darawalku waa jaban tahay, qolada dhinacooda muraayd haaddu shaqaynaysona waxay latahay socodkii ugu wanaagsanaa inuu gaarigu soconayo, waxay ku mashquulsanyihiin ka sheekaysiga toobiye qodax badnaa oo waayo hore ay soo jibaaxeen waxaana la is toyanayaa adiga qodaxdii waagii ku mudday ma caraacar bay ahayd, ma gocondho bay ahayd, ma dhirindhir bay ahayd mise jeerin. Gadaalka dambe oo aan dhab u sii fogeyn-na bohol weyn oo caan ah baa ku taal. Kolka Wadeeca ALLAH.

Suguntaa ku raagtaye
Marshadaan ha-laga rogo
Oo foor halagu rido
Runti meeshi lala- rabey
Puntland waa ka raagtaye
Rakaab daallan baa yiri!!!!!!!!!!

Ra'yigaas dadweynihi
Badi waw riyaaqeen
Durba laysku roor-roor
Si rakaabku loohelo
Qof kaxeeya raranaha!!!!

Rafaad iyo dhib dabadeed
Rijaal baa lahelay culus
Laye waa rafaadnaye
Qabo gadowga raranaha
Isna waa rakuubsaday
Kursi lagama rooree
Teendhaana lagu rogey
Rakaabkii hurdaysnaa
Si ay run ugu seexdaan!!!!!!!!!!!!!!!!!!!!

Meel rafaal la marayoo
Raq-raq socodku yahayoo
Ruug-caddaagi suguntadi
Damac inu u rogo foor
Reefis baase kaga dhacay!!!!!!!!!!!!!!!!!!!!

Rakaabkiina qaar horay
La fadhiyey rijaalkaa
Yiri raaxa badanaa
Noogu daa rabtaadaas
Manuu eegin raranuhu
Jahaduu usaan rogey!!!!!!!!!!!!!!!!!!!!

Runtu saas inay tahay
Dib u eeg rabtaan niil
Ka-hor reefis socodkaan
Iyo maanta raranuhu
Raaska uu arruman yahay!!!!!!!!!!!!!!!!!!!!

Qoray oo Allifay MMX Gaani